# XAASHIDA XAQIIQDA # 10
# SABOOLNIMADA LA XARIIRTA HUBINTA CUNTADA IYO BIYAHA

Sidee loo kala sooca dadka ku liito hubsashada cuntada iyo biyaha?



Ontaariyo ayaa ugu xun Kanada ilaa iyo 2011, heerar ka ugu sarreeyo ee sugnaan la'aanta cunnada ee Kanada ayaa laga soo sheegay Toronto boqolkiiba 10.1 iyo woqooyiga Ontaariyo boqolkiiba 9.7

**Kaalmada Bulshada:** Laga billaabo 2011, boqolkiiba 70 qoysaska ku nool gobalka Ontaariyo oo isha ugu weyn ee dakhligoodu ahaa kaalmada bulshada ayaa ku jiray cunto yari ama cunto la'aan.

**Daqliga:** Boqolkiiba 20.2 qoysaska ku nool dakhliga hooseeya ee laga gooyey Ottawa waxay soosheegaan in ay si dhexdhexaad ah u yihiin cunno yarida darran, ama ba'an marka la barbardhigo boqolkiiba 3.5 kuwa ka sarreeyo (LICO). (daqligoosatka)

**Iskuullada**: Cunno yaraanta qoysasku waxay ku dhacdaa mid ka mid ah lixdii carruur Kanadiyaanka ah ee ka yar 18, laakiin si ka duwan Maraykanka iyo dalal kale oo badan oo warshado leh, Kanada ma leh barnaamijka cuntada dugsiga ee qaranka.

**Soogalootigii ugu danbeeyay:** Sanadkii 2011-2012 ku dhawaad 1.1 milyan oo reer Kanada ah ayaa la soo deristay cunnno xumo: waxay ka sarreysay soogalootigii dhowaanta oo boqolkiiba 19.6 ahaa oo inta badan ahaa dad midab leh, marka la barbar dhigo soogalootiga aan dhawaan iman oo ahaa "boqolkiiba 11.8" iyo dadka Kanada ku dhashay boqolkiiba 12.4.

**Bulshada/Go'aaminta Qaab Dhismeed:** qaab dhismeedka Seddex arrimood oo waaweyn oo cunno darrada ayaa laga helay soogalootiga Latin Ameerika ee ku nool Totonto; kaalmada bulshada waa dakhliga ugu weyn, isticmaalka bankiyada cuntada iyo akhriska ingiriiska oo xaddidan.

**Dhaqan la Aqbali Karo**: Dadka asaliga ah iyo dadka midabka leh caadiyan waxay ogaadeen in aysan heli karin dhaqan aamin ah iyo cuntooyin la xiriira, oo ku fiican caafimaadkooda, kuna wanaagsan xarumaha dadweynaha iyo barnaamijka sugnaanta cuntada. Waxaa loo arkaa in ay yihiin raaxo halkii ay daruuri ka ahayd.

**Soogalootiga:** Soogalootiga ku jira Kanada ayaa laba jeer ka badan in ay ku dhowdahay in cunno yari ay ku dhacdo waxayna u nogul yihiin in ay hoos u dhacdo caafimaadka kadib marka ay yimaadaan.

**Diirad Gelinta Dadka Asaliga:**
Intii u dhaxeysay 2004ta iyo 2014ka , sedex meelood labo meel dadka asaliga ah ee ku nool Kanada waxay ku noolaayeen ugu yaraan hal lataliyo biyo (ogeysiis caafimaadka dadweynaha in biyaha wasakhoobeen).

**43**

Gudaha Ontaariyo 46 la talin biyo la cabo oo ah muddo dheer waxase laga jaray 25 lataliye bulshooyinka asaliga ah ilaa sanadki 2018.

Boqolkiiba 90 dadweynaha Grassy Narrows iyo Wabaseemoong ummada ugu horreysay waxay muujiyeen calaamadah soo gaadhista meerkurida ee nidaamka Wabigoon-English River.

Qoysaska asaliga ah waxay la kulmaan suuragalnimo sare oo cunno xumo. Boqolkiiba 5.1 qoysaska asaliga waxay la kulmaan sugnaan la'aanta cunto oo aan la aqbalikarin. Boqolkiiba 14.8 waxay la kulmaan cunno yari oo dhexdexaad ah iyo 8.3 waxay la kulmaan cunno xumo daran.

Boqolkiiba 20 dadka waaweyn ee asaliga ah ee degan Toronto oo ku nool guri ugu yaraan hal cunug joogo ayaa tilmaamay badanaa in aysan haysan cunno ku filan.

Sanadkii 2011ka waxaa lagu qiyaasay boqolkii 29 dadka asaliga ah ee da'dooda tahay 18 ama ka weyn ayaa ku noolaa qoysas cunno la'aan haysato. Marin u helka iyo isticmaalka cuntooyin dhaqameedka ayaa ah qaabab muhiim ah oo looga hortagaayo xasillooni darrada cuntada iyo wanaajinta caafimaadka ka dhex jira dadka asaliga ah. Boqolkiiba 70 dadka waaweyn ee asaliga ah ee ku nool Toronto waxay doorbidaan cunista cunno dhaqameed badan ama cuntada dalka in ka badan waxa ay hadda cunnan.

**Colour of poverty/ colour of change**
www.colourofpoverty.ca

**Boqolkiiba qoysaska ku nool Kanada ee dhexdhexaadka ah ama daran ee haqab-beelka cuntada (2007-2010) sida warbixintii 2013 iyo 2015.**




## Qoraal Degdeg ah!

Markaan tixraacno dadka midabka leh waxaan u hadalnaa dadka reer Kanada ee asal ahaan aan yurub ka soo jeedin ama dhaxalka – labadaba dadka midabka leh ee ku dhashay Kanada iyo sidoo kale kuwo ku dhashay meel kale.

Markaan tixraacno dadka asaliga ah waxaan u hadleynaa shaqsiyaadka ummadda kowaad ee Inuit and Metis.

Magalada Toronto, boqolkiiba 62 dadka ku nool saboolnimada waxay ka so jeedaan kooxo isir raac ah.

Boqolkiiba 52 dadka midabtakoorka Kanada ee ku nool saboolnimada waxay ku nool yihiin Ontaariyo.

Reeraha hoos taga dakhligooda hooseeyo ee Kanada (LICO) ama cabirka dakhliga (LIM), waxay ku bixiyanaan

boqolkiiba in aad u badan dakhligooda daruuriga aasaasiga ah sida cuntada iyo hoyga marka loo eego qoyska caadiga ah; sidaan ayaanu u cabbirnaa saboolnimada.

Midab-kala sooca habbeysan ayaa badanaa keena xaqiraad hay'ad qarsoon oo ku saabsan siyaasadaha, dhaqannada iyo habraacyada mudnaanta u leh ama faa'iido darro u noqon kara kooxo dad ah. Waxay noqon kartaa natiijada ka soo baxda sida wax loo sameeyo had iyo jeer ayadoo aan la tixgelinaynin sida ay u saameeyaan koox gaar ah si ka duwan sidii hore.

Sahanno kale ayaa sheegaya in heerarka cunto yaraanta ama sugnaan la'aanta ee qoyska Inuit ay xitaa ka sii badnaan karaan ayaga oo gaaraya in ka badan boqolkii 62.

**Sugnaanta cunnada** Macnaheedu waa in dhamaan dadka ka tirsan bulshada aa ku nool ayheli karaan cunno ay awoodi karaan taasina waa: caafimaad qab iyo badbaado ku filan qaysaskooda; laga billaabo dukaannada maxalliga ah (halka laga isticmali lahaa bangiyo cunto iyo hoy) ku koray dariiqooyin badbaado u leh deegaanka; dhaqan ahaan la aqbali karo; ku hoboon oo la yaqaano.

**Amniga biyha** Ma ku qeexi karnaa awood u helitaanka tiro ku filan oo biyo nadiif ah si loo joogteeyo heerar ku filan oo cuntada iyo wax soo saarka badeecada, fayadhowrka haboon, caafimaad waara iyo ladnaanta.

## Maaxa la gabtay?

Afri-Can Food Basket waa bulsha ku salaysan samafal aan faa'iido doon ahayn. Iskaashi, horumar, iyo dhaqaaq bulshadeed ee ka go'an inay buuxiso baahida nafaqada, caafimaadka, baahida shoqo ee xubnaha jaaliyadaha Africaanka ah gaar ahaan kuwa dhaqaale iyo bulsho ahaanba u nugul.

www.africanfoodbasket.com /
info@africanfoodbasket.ca

Access Alliance wuxuu u shaqeeyaa bangiyada cuntada iyo u doodayaasha si loo kordhiyo healtlaankaka cusub ee bangiyada cuntada iyo in la hormariyo dhaqanka gaarsiinta qaab adeeg oo ku habboon.

www.accessalliance.ca /
communications@accessalliance.ca

Foodshare waxay soo jeedineysaa isbeddelo badan oo siyaasadeed iyo talaabo lagu hormariyo haqab-beelka cuntada sida dejinta heerarka ugu hooseeya ee dakhliga iyo siyaasadaha kor u qaadista sinnaanta shaqada iyo saameynta cuntada aasaasiga oh ee xuquuqda aadanaha.

www.foodshare.net / info@foodshare.net